



Reply to Mayor's Office
E-mail mayor@bristol.gov.uk
Date 16 September 2016

Waalidka sharafta mudan,

Lacagta Abaalmarinta Ardayda (Pupil Premium) – Wargelin ka timid Maayarka iyo Xildhibaan Claire Hiscott oo ku saabsan deeqdan muhiimka ah

Waxaan rajaynaynaa in ilmahaagu uu si fiican ula qabsaday iskuulkii cusbaa!

Waxaanu warqaddan kuugu soo qoraynaa in aanu hoosta ka xariiqno qayb muhiim ah oo ka mind ah deeqdan lacageed ee loogu talo galay waxbarashada ilmahaaga – Lacagta Abaalmarinta Ardayda (the Pupil Premium).

Dhamaan ardayda waalidiintood qaataan qaar ka mid ah lacagaha lagu kabo dadka dakhligoodu hooseeyo (benefits) waxay xaq u leeyihiin in ay helaan deeqdan lacageed ee dheeraadka ah. Ujeedadeedu waa in ardayda ka yimaadda qoysas uu dakhligoodu hooseeyo ay helaan bilow fiican oo ay nolosha ku hiigsadaan.

Lacagtu wax weyn oo muhiim ah ayay tartaa iskuulka iyo ardayda sharci ahaan xaq u leh in ay qaataan!

Lacagtu waa ilaa £935 ilmo kasta – iskuulka ayaana toos loo siiyaa. Waxa lagu bixiyaa waxyaabaha ay ka mid yihiin safarada iskuulka (school trips), naadiyada quraacda (breakfast clubs), ama macalimiin iyo kaaliyeyaal dheeraad ah oo caawimo dheeraad ah bixiya ama si gaar ahaana mid-mid ardayda waxbarashada uga caawiya (1 to 1 tutoring). Warbiximaha iskuulka ee ilmahaaga ku saabsan iyo sida lacagta loo isticmaalo waxaad ka helayaa degelka iskuulka (school website).

Dhamaan ardayda dugsiga sare ku jirta ee xaq u leh in ay iskuulka ka helaan cunto bilaash ah, ayaa sidookale sharcigu u ogolaanayaa in ay qaataan Lacagta Abaalmarinta Ardayda (Pupil Premium). Cilmi baadhis ayaa sheegaysa cunto caafimaad leh oo qadadii la cunaa waxay ardayda ka caawisaa in ay waxbarashada ku wanaagsanaadaan. Sidaa daraadeed waxaanu aad u danaynaynaa in ardayda sharci ahaan xaq u lihi ay ka faa'iidaystaan.

Mayor's Office

Bristol City Council
PO Box 3176
Bristol BS3 9FS

Marvin Rees
Mayor of Bristol

Website
www.bristol.gov.uk

Waalidiin badan oo caruurtoodu xaq u leeyihiin ayaan ogayn in ay weli u baahanyihiin in ay saxeeaan oo ay qaataan cuntada bilaashka ah ee iskuulka laga bixiyo. Haddii aanay sidaa samaynin, ardaydu cuntada ma helayaan, waxaana laga yaabaa in iskuulku aanu helin Lacagta Abaalmarinta Ardayda (Pupil Premium) – dakhli aad muhiim u ah.

Fadlan akhri macluumaadka hoos ku qoran. Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu uu xaq u leeyahay, fadlan iskuulkaaga la xidhiidh si aad u hesho akhbaar dheeraad ah iyo sida aad u codsanayso. Caruurta dhigata fasalka ugu hooseeya (Reception) ilaa fasalka 6aad (Year 6) ayaa laga yaabaa in ay sharci ahaan xaq u leeyihiin.

Ogeysiis: Deeqda lacageed ee la siiyo caruurta ay waalidiin kale daryeelaan ama daryeel ku jira (looked after/in care) ama sharci ahaan waalid kale loogu wareejiyay (adopted) way ka duwantahay. Faahfaahin dheeraad ah waxaad kala xidhiidhi kartaa Hope Virtual School: 0117 9036282 ama booqo www.bristol.gov.uk kadibna baaadh 'Hope Virtual School'.

Ilmahaagu sharci ahaan xaq miyuu u leeyahay Lacagta Ardayda (Pupil Premium)?

Si uu iskuulku u helo deeqda lacageed ee deeqda Lacagta Abaalmarinta Ardayda (Pupil Premium funding), waalidku waa in uu qaataa mid ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

- Income Support
- Income-based Jobseeker's Allowance
- Income-related Employment and Support Allowance
- Support under Part 6 of the Immigration and Asylum Act 1999
- The guaranteed element of State Pension Credit
- Child Tax Credit (as long as you're not also entitled to Working Tax Credit and have an annual gross income of no more than £16,190)
- Working Tax Credit run-on (paid for four weeks after you stop qualifying for Working Tax Credit)
- Universal Credit.

Tallaabada Xigta:

Marka aad iskuulka la xidhiidho ee aad foomka buuxiso, kadib waxaanu eegi karnaa in ilmahaagu uu xaq u leeyahay; waxaanu ka soo ogaanaa Wasaaradda Waxbarashada (Department of Education). Ma bixinayno akhbaar kale oo adiga iyo ilmahaaga ku saabsan. Warqad ay ku qorantahay natiijadii arjigaaga ayaaad naga heli doontaa.

Haddii uu ilmahaagu deeqdan lacageed xaq u leeyahay, iskuulka uu ilmahaagu dhigto ayaa hawsha qaban doonaa, wayna kula soo xidhiidhi doonaan haddii macluumaad dheeraad ah lagaaga baahanyahay.

Haddii aanu ilmahaagu imika xaq u lahayn, fadlan mar kale mustaqbalka codso. Xaaladahaaga oo isbedela ayaa keeni kara in arjigaagu mar ka dambe la aqbalo.

Macluumaad arrintan ku saabsan waxaad ka heli kartaa degalka Golaha Deegaanka Bristol: <https://www.bristol.gov.uk/schools-learning-early-years/free-school-meals> (Waxa kale oo aad baadhi kartaa 'Pupil Premium' on www.bristol.gov.uk)

Waxaan rajaynaynaa in macluumaadkani yahay mid caawimo leh ama laga faa'iidayasan karo. Waxaanu doonaynaa in ilmo kasta oo Bristol ku nooli uu helo waxa ugu fiican.

Mahadsanid,

Marvin Rees, Maayarka Bristol iyo Xildhibaan Claire Hiscott, Xubinta Golaha Deegaanka u Qaabilsan Waxbarashada iyo Xirfadaha

Halka laqala soo xidhiidhayo:

Free School Meals

Bristol City Council, PO Box 3176, Bristol, BS3 9FS

Email: free.school.meals@bristol.gov.uk

Tel: 0117 903 7990